



Reynoldsburg Community Garden

Beer dadwayne waxay uga dhigan tahay waxyaabo badan qaar badan oo dadka kamid ah. Dadka qaar, beerta bulshada waa meel lagu beero cuntada, ubaxyada, iyo daawo dhaqameedka ayadoo lala kaashanaayo saaxiibada iyo dariska. Qaar kale oo dadka kamid ah, waa meel ay dib ugu xidhmaan dabeecadda rabaaniga ah ama ay ku sameeyaan jimicsi.

Beeraha bulshada ee guulaysta ee firfircoon ayaa ku tiirsan dadaalka uu sameeyo qof kasta oo beerta isticmaala si loo dhawro dhulka loogana qayb qaato ilaalinta iyo maaraynta beerta iyada oo loo dhan yahay. Odhaahda ah *in gacmo badan sameeyaan shaqo fudud* ayaa ah mid aad u wanaagsan. Haddii qof kasta uu uga qaybqaato si waafaqsan awoodiisa iyo doonistiisa shaqsiga ah, beerta ayaa samaynaysa kobac iyo hormar.

Beerta bulshada ayaa leh fursad ay ku siin karto faa'iidooyin kala duwan shaqsiyaadka, qoysaska, bulshooyinka iyo bii'ada. Faa'iidooyinka waxaa kamid ah:

Soo saarista Cuntada – Beeraha bulshadu waxay dadka u sahlaan inay beertaan miro iyo khudaar tayo leh oo ay u helaan naftooda, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda.

Nafaqada – Cilmi baarista qaar ayaa muujinaysa in beeraleeyda bulshadu cunaan miro iyo khudaar ka badan qoysaska aan beeraha lahayn.

Jimicsiga – Beer falidu waxay u baahan tahay shaqo jireed waxayna ka caawisaa kor u qaadista caafimaadka guud ee jirka dadka beerta falaaya.

Caafimaadka Dhimirka – La joogista dabiicada iyo geedaha ayaa kaa caawinaysa yaraynta walaaca waxayna kordhisaa dareenka fayaqabka iyo mulkiyada ee beer falaha.

Bulshada – Beeraha bulshadu waxay adkeeyaan dareenka aqoonsiga bulshada, mulkiyada iyo midnimada dadka beeraleeyda ah. Waa meel ay dadka qoomiyadaha kala duwan iskugu yimaadaan ayna ku wadaagaan soojireenada dhaqaneed.

Bii'ada – Beeruhu waxay gacan ka gaystaan yaraynta saamaynta jasiiradaha kulaylka ay ku leeyihiin magaalooyinka, waxay kordhiyaan kala duwanaanshaha noolaha, waxay yareeyaan qulqulka biyaha roobka, waxay dib u adeegsadaan waxyaabaha noolaha kasoo jeeda ee deegaanka waxayna yareeyaan adeegsiga shidaalka ku baxa cuntada laga keeno meelaha fog-fog.

Wax barashada – Dadka ah dhammaan da'aha ayaa heli kara wadaaginta kara xirfadaha iyo aqoonta la xariirta beerista, cunto karinta, nafaqada, caafimaadka, dhaqanka, iwm.

Dhalinyarada – beeraha bulshada ayaa hooy u noqda dhalinta la kormeeraayo si ay u arkaan beerista, dabiicada iyo bulshada.

Waxaas oo dhan waxaa ka badan, beeraha bulshada ayaa siin kara dareen qanaaco iyo guul dhammaan shaqsiyaadka.

Guusha Community Garden

- Qorshee inaad booqato beertaada **labo ilaa sadex jeer toddobaadkii** inta lagu jiro xili beereedka. Jadwal u samee naftaada ama beeraleeyda kale. Ku qor kalaandarkaaga ama ku dhago xasuusin qurux badan talaagada. Sabab la xariirta inaan beertaadu ku oolin banaanka albaabkaaga hore ama danbe, mararka qaar waa wax fudud inaad iloowdo inay jiraan harameyn, waraabin, ruxid ama beer gurasho ku sugaysa.
- Ka qaybgal kulannada mudaysan iyo maalmaha shaqada. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad la kulanto beeraleeyda kale aadna qayb ka noqoto bulshadaada beeraleeyda. Waxaad sidoo kale wax ka baran doontaa qaybaha kala duwan ee shaqooyinka iyo mashruucyada u baahan inaad samayso si aad u nidamaiso beertaada.
- La saaxiib beeraleeyda kale. Beeraleeyda khibrada leh ayaa ah il muhiim u ah beertaada. Ka baro farsamooyinka wax beerista ama booqo dhulkooda si aad u aragto sida ay u baakadeeyaan yaanyadooda ama u gal baxshaan digirtooda.
- Ku tabaruc shaqada beerta ama gudigga beerta. Beeraha bulshadu ayagu isma maamulaan. Waxay u baahan yihiin xaddi habboon oo shaqo ah. Markaad ka qaybgasho shaqo ama mashruuc gaar ah, waxaad gacan siinaysaa beerta si guud waxaadna xaqiijinaysaa in shaqada ay wadaagaan dad badan.
- Waxbar naftaada. Kasoo qaado buugaag maktabada. Ka qaybgal fasallada. Noqo Khabiir Beereed. Markasta waxaa jira wax aad ka baran karto beeraha. Hadba intaad wax barato, ayay kordhaysaa guushaadu.
- Baro dariskaaga. Baro magacyada iyo waxyar oo ku saabsan dariskaaga aan beeralayda ahayn. La wadaag waxoogaa kamid ah cuntada dheeriga ah ee aad soo saarto. Waqti geli si aad ugala hadasho dariska sida beertu u shaqayso haddii aysan aqoon.
- Si joogto ah u jaro miraha beertaada. Inta lagu jiro xiliga beeruhu soo go'aan, u sheeg hogaamiyaasha beerta haddii aad doonayso inaad ka maqnaato magaalada wax ka badan dhawr maalmood. Beeraleeyda ayaa kuu goyn kara waxa beertaada kasoo go'a kadibna ugu deeqi kara cuntada kayd cunto oo maxali ah.
- Beer cunto ka badan baahidaada. Waxaa jira fursado aad cuntada dheeriga ah ugu deeqi karto ururada deeqaha baxsha.
- Soo qaado taleefankaaga gacanta. Haddii cilad ku qabsato, ku kaydso lambarada muhiimka ah taleefankaaga.
- Jooji beerista beertaada marka xili beereedku dhamaado beeraha ayaana xirma Diseembar 1^{deeda}. Tani waxay xaqiijinaysaa in kobaca haramaha beeraha xumeeya ee sanadaha soo socda la yareeyo nafaqada loo baahan yahayna ay kusoo laabato ciida si aad ugu beerto sanadka soo socda. Arintaan ayaa sidoo kale imaanaysa haddii, sabab jirta awgeed, aadan awoodin inaad aado ilaa beertaada si aad usoo gurato waxa ka baxay dhulkaaga ayna qasab noqoto inaad iska dhaafto ama joojiso kahor intaan xili beereedku dhamaan.

Qeexitaannada Shaqada Beerta Bulshada

Gudigga Beerta

- **Wakiilka Beeraha Raaxada iyo Nasiinada:** Aqoonsa oo shaqaalaysii hogaamiyaasha cusub ee beerta. Gudoonka u qabo gudigga abaabulka beerta.
- **Iskuduwaha Waxbarashada:** Wuxuu iskuduba ridaa munaasabadaha caadiga ah iyo kuwa gaarka ah ee beerta ayna ku jiraan xafladaha shaqada, xafladaha xaafada, iyo kulannada aqoon korosiga ah.
- **Iskuduwaha Isgaarsiinta:** Wuxuu beeraleyda kula xariiraa iimeel, wicitaannada taleefanka ama boostooyinka si uu ugu sheego wararka, kulannada iyo munaasabadaha beeraha. Wuxuu hayaa boorka tilmaamaha ee beerta. Wuxuu isku dubaridaa kulannada/shaqooyinka beerta. Wuxuu iskula dubaridaa kooxaha kale ee ay qusayso (Sustainable Reynoldsburg, Garden Clubs, Crossroads Community Development Corporation), wuxuu abaabulaa booqashada lagu tago, iyo la xariirida, beeraha kale ee bulshada.
- **Iskuduwaha ilaalina:** Wuxuu maamulaa liiska sugitaanka, wuxuu masuul ka yahay qalabka jaba ama waxyeeleoba iyo kaabayaasha. Wuxuu maamulaa Shaqaalaha Dhul falida, Shaqaalaha Bacriminta, iyo shaqooyinka mutadawiciinta.

Shaqooyinka Mutadawiciinta

Iskuduwaha Ilaalinta ayaa maamula shaqooyinkan

- **Shaqaalaha dhul Falida:** Wuxuu ilaaliyaa aagaga guud ee beerta. Wuxuu jaraa cawska haddii loo baahdo, wuxuu xaaqaa wadooyinka wuxuuna meesha ka saaraa qashinka. Wuxuu ilaaliyaa uuna kormeeraa bacriminta iyo qasacyada bacriminta. Wuxuu siiyaa beeraleyda caawimaad ku aadan qaadista ama maamulida bacriminta.
- **Jack/Jill ka dhammaan ganacsiyada:** Dadka doonaaya inay ka qaybgalaan, gaar ahaana inta lagu jiro nadiifinnada kahor iyo kadib xili beereedka.
- **Horyaalka Beerta:** Hal POC oo hagaaya marinka xariirada iyo ku dhaqanka xeerarka beerta, iwm. Wuxuu dirayaa talooyinka iyo xalalka marka cilado soo baxaan.

Shaqadaan waxaa maamulaaya Iskuduwaha Waxbarashada

- **La taliyaasha Beerista:** Waxay khiBrad u leeyihiin beerta waxayna doonayaan inay la wadaagaan dadka beeraleyda ah. Wuxuu tababaraa beeraleyda cusub, wuxuu faafiyaa ilaha cusub ee beeraha, wuxuuna isku dubaridaa kulannada aqoon korodhsiga beeraha asagoo kaashanaaya shaqaalaha munaasabada.
- **Taariikhyahannada Beerta:** Ilaaliyaasha joornaalka qoran iyo sawirada shaqooyinka beeraha ee loogu talagalay jiilasha mustaqbalka.

Koxda Beeraha Bulshada

Magaca	Ururka	Taleefanka	Iimeelka
David Gubanc	Iskuduwaha Ilaalinta	496-5444	David_gubanc@att.net
Phyllis Gubanc	Iskuduwaha Isgaarsiinta	204-0775	pgubanc@att.net
Brian McGuire	Magaalada Reynoldsburg (Kormeeraha Ilaalinta)	322-4510	bmcguire@ci.reynoldsburg.oh.us
Michelle Brennan	Magaalada Reynoldsburg (Kaaliyaha Maamulka)	322-6806	mbrennan@ci.reynoldsburg.oh.us
Ryan Lauber	Magaalada Reynoldsburg (Khabiirka Beeraha)	322-4504	rlauber@ci.reynoldsburg.oh.us
Donna Bauman	Magaalada Reynoldsburg (Agaasimaha Beeraha Raaxada iyo Nasiinada)	322-6806	dbauman@ci.reynoldsburg.oh.us

Munaasabada	Taariikhda/Waqtiga	Goobta	Ujeedada
Kulanka Isbarashada ah	TBA 6:00gd	Qolka Guud ee shirarka Hoolka Magaalada	<ul style="list-style-type: none"> • Waxaan bixinaa shaqooyinka dhulka • Akhri tusmooyinka • Akhri xogta xariirka • Aqoonso “Tababarayaasha” • Akhri shaqooyinka mutadawiciinta • Akhri jadwalka - haddii aan leenahay casharo ama tababaro
Maalinta Furitaanka (Gu'ga)	Maayo 3deeda	Beeraha	Biyaha ayaa la shidayaa
Xarunta Caafimaadka Bacriminta oo Bilaash ah	TBA	Beeraha Bulshada ee Livingston	Si loo baro dhammaan beeraleeyda cusub iyo kuwa beeraha kusoo laabanaaya hannaanka bacriminta ee loo adeegsado beerta iyo sida loo gaarsiyo tilmaamaha bacriminta dhammaan dadka ka qaybgeleyaasha ah.
Dabaal Dega Maalinta Arbor	Jimcada ugu Danbaysa Bisha Abriil 4gd		Waxaa loo dabaal degaa geedaha iyo muhiimada ay u leeyihiin bulshadeena
Iibka Geedaha	TBA	Livingston House 1792 Graham Rd	Waxaa abaabulay Four Seasons Garden Club.
Beerta Reynoldsburg	Sabtida 3 ^{aad} bisha Maayo 9gh-12gd	Hoolka Magaalada 7232 East Main St.	Waxaa abaabulay waaxda Beeraha Laydhsiga iyo Nasiinada. Shaqaalaha beerta; munaasabadaan waa fursad gacan naga siinaysa qurxinta deegaankeena.
Maalinta u Danbaysa ee La Kiraysto Dhul Beereed	Jimcada 2 ^{aad} ee Juun		Tani waa taariikhda ugu danbaysa ee aad kiraysanayso dhul beereed
Maiinta koobaad ee Suuqa Beeraleeyda Reynoldsburg	Juun - Sibteembar 4:00 – 7:00 g.d. Khamiis Kasta	JFK Reynoldsburg	Ku raaxayso dhadhanka miraha iyo khudaarta cusub ee lasoo jaray markaad booqato dariskaaga jooga Suuqa Beeraleeyda Reynoldsburg. Wac (614) 322-6807 si aad u hesho xog dheeraad ah.
Biyo Xirista	Oktoobar 31	Beeraha	DHAMMAAN biyaha ayaa laga xiri doonaa xarumaha.
Maalinta Xiritaanka	Diseembar 1	Beeraha	Dhulka beeraha WAA IN loo diyaarshaa bilaha jiilaalka.

Maalmaha ugu Fiican Beerista Iniinyaha

The Old Farmer's Almanac.com

Midhaha	Ku Biloow Iniinaha Gudaha	Maalmaha ugu Fiican ee Dayaxeedka	Ku biloow Iniinaha Dhulka	Maalmaha ugu Fiican ee Dayaxeedka
Digirta			Abriil 24-Maayo 8	Abriil 24-25
Baytaraafka			Abriil 3-Maayo 15	Abriil 3-9
Barookooliga	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13	Abriil 3-10	Abriil 10
Buurbuurka Brussels	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13		
Kaabajka	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13	Abriil 17-Maayo 1	Abriil 17-25
Karootada			Maarso 20-Abriil 3	Maarso 28-Abriil 3
Gabal qariyaha	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13	Abriil 17-Maayo 1	Abriil 17-25
Salarka	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13		
Gallayda			Maayo 8-15	Maayo 9-15
Qanjaarka	Maarso 27-Abriil 10	Maarso 27	Maayo 1-8	
Ansalaato cagaarka	Maarso 13-27	Maarso 13-27	Abriil 17-Maayo 8	Abriil 17-25
Qaraha	Maarso 27-Abriil 10	Maarso 27	Maayo 8-15	Maayo 9-15
Miraha basasha			Maarso 27-Abriil 3	Maarso 28-Abriil 3
Parsnips			Abriil 3-24	Abriil 3-9
Atarka			Maarso 13-27	Maarso 13-27
Basbaaska	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13		
Yuubooyinka baradhada			Abriil 24-Maayo 8	Abriil 26-Maayo 8
Babkiinka	Maarso 27-Abriil 10	Maarso 27	Maayo 1-8	
Radishes			Abriil 17-Maayo 1	Abriil 26-Maayo 1
Isbinaajka			Maarso 13-27	Maarso 13-27
Bocorka, xagaaga	Maarso 27-Abriil 10	Maarso 27	Maayo 1-8	
Bocorka, jiilaalka	Maarso 27-Abriil 10	Maarso 27	Maayo 1-8	
Yaanyada	Feebaraayo 26-Maarso 13	Maarso 11-13		

Su'aalaha badanaa la iswaydiiyo

Kuwa soo socda waa jawaabaha qaar kamid ah *Su'aalaha badanaa la iswaydiiyo*. Su'aalaha kale waxaa loo diri karaa Reynoldsburg Parks and Recreation oo laga helaayo 614-322-6806.

Xagee ayay beeruhu ku yaalaan? Beerta Livingston waxay ku taalaa dhabarka danbe ee Waaxda Dabdemiska ee Degmada Truro oo ku taalla 6305 Livingston Avenue.

Baarkin ayaa laga helayaa aaga baarkinka COTA oo ku yaala 2100 Birchview Drive. Beerta Bulshada Civic waxay ku dhex taalaa Civic Park 6800 Daugherty Ave. Baarkin ayay leedahay beertu.

Waa meeqa qarashka beerashada meeshaan? Dhul beereed buuxa oo dhan 10' x 20' ayaa laga qaadayaa **\$40 halkii qof ee dagaanka ahba; \$50 ayaa laga qaadayaa dadka aan dagaanka ahayn** sanadkiiba. Nus dhul beereed ah ayaa ah \$20 halkii qof oo deegaanka ahba; \$25 dadka aan deegaanka ahayn. **Wax qiimo dhimis ah kuma helaysid dhul beereedyada badan.**

Waa maxay noocyada qalabka, agabka iyo adeegyada laga heli karo beerta? Hadda ma jiraan qalabka beeraha bulshada. Waa inaad la timaado qalabkaaga gaarka ah aadna qalabkaaga ku haysato meesha adoo masuul ka ah amaankiisa.

Miyaan ku xiran karaa tuumbo isha biyaha beerta? Haa. Biyo firdhiye ayaa lagu rakibi doonaa labada qasabodoodba si loogu sahlo in sadex tuumbo lagu xiro markiiba. Beeraleeyda ayaa masuul ka noqon doona keenista tuubooyinkooda iyo inay gurigooda la aadaan markay shaqada ku dhameeyaan. Tuubooyinka looga tago beerta waxaa masuuliyada khatarta ku imaan karta qaadaaya beeraleeyda.

Xagee ayaa la ogol yahay in la dhigo tuubooyinka biyaha? Beeraleeydu **WAA INAY** niyada ku hayaan markasta goobta ay dhigeen tuumbooyinkooda. **Tuubooyinka LAMA marsiin karo dhulka beereedka dadka kale.** Haddii waxyeelo loo gaysto si joogto ah dhul beereedyada kale ayna gaystaan tuubooyinka beeraleeyda ayaan loo ogolaan doonin inay sii wataan adeegsigoo.

Maxay tahay inaan sameeyo si aan u lahaado guul aan ka gaaro beerta? 1) Iska qor mid kamid ah shaqooyinka badan ee mutadawacnimada ah, 2) Ilaali dhul beereedkaaga, 4) Iska dhiib lacagta sanadlaha ah, 5) Isha ku haay meesha tuubadaadu marto si aad uga ilalaiso dhul beereedyada dadka kale, 6) xaqiiji inaad beerta xirto jiilaalka bisha Diseembar 1deeda.

Yaan la xariiraaya si la iisiiyo talada beerista? Gudigga beerta ayaa kugu xiri kara khubarada kala duwan ee beerta kuwaasoo gacan ka gaystay nidaaminta beertaan.

Maxaan ku beeri karaa dhul beereedkayga? Ayadoo ay jiraan xadidaado dhawr ah, waxa aad ku beerayso aday ku jirtaa. Geedo caadi ah LAGUMA beeri karo dhul beereedka. Marba haddii aad ilaaliso qaabka dhul beereedkaaga adiga oo haramaynaya aadna u daryeesho si joogto ah, inta badan nooc kasta oo khudaar ah, daawo dhaqameed, ama ubaxyo ayaa la ogol yahay. Fadlan iska ilaali inaad beerto wax kasta oo ay u aqoonsato mid "faafid badan" Waaxda Ohio ee Khayraadka Dabiiciga ah ama Waaxda Maraykanka ee Beeraha. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xariir Gudigga Abaabulka.

Waa maxay noocyada xayndaabka iyo qaab dhismeedka kale ee la ogol yahay? Xayndaabyada si wayn ayaa loo diidayaa, laakiin haddii aad isticmaasho waa inay noqdaan kuwo siman oo adag aana ka dheerayn **36"**. Haddii la adeegsado, xayndaabku waa inuu noqdaa mid yar waana in meesha uu ka saaraa beertuhu marka xili beereedku idlaado. Niyada ku haay dariskaaga beeraleeyda ah marka aad xayndaab samaynayo. Lama ogola in xayndaabku xanibo in la arko dhammaan beerta. Waxyaabaha la ogol yahay waa siliga iyo fiilooyinka loo adeegsado geedaha marmarka ah, kuwaasoo aan ka dheerayn 6 fuudh.

Ma hubo inaan sii wadi karo shaqada dhul beereed buuxa ama xataa nuskiis laakiin wali waan jeclahay inaan wax beero. Maxay tahay inaan sameeyo? Iskuday inaad codsato beer lagula wadaagaayo. Adoo adeegsanaaya foomka Codsiga Beerta, waxaad sheegi kartaa inaad doonayso inaad dhul beereed la qaybsato qof kale. Waxaan isku dayi doonaa inaanu kugu beegno beerte kale kadibna waxaad ka wada shaqayn kartaan nus dhul beereed ah.

Dhul beereedkayga ma la ii qodi doonaa maadaama oo aan ahay beerte cusub? Haa, Waaxda Magaalada Reynoldsburg ee Beeraha Laydhsiga iyo Nasiinada ayaa dhul beereedyada u qodi doonta beerte kasta oo cusub. Fadlan sii 14 maalmood oo kuwa shaqada ah kadib marka aad isdiwaan geliso si qoditaanku u dhaco.

Waa maalintee maalinta ugu danbaysa ee dhul beereed la kiraysan karo? Maalinta u danbaysa ee kirada booska beertu waa Juun 15. Ma jiraan kirooyin la aqbali doono kadib taariikhdaan.

Xeerarka Beerta

Dhul beereedyada waxaa lagu baxshaa sida loosoo kala hormaro beeraleeyda cusubna MA codsan karaan in dhul beereed laga siiyo aag gaar ah, anaga ayaa dhul beereedka kuu qoondaynayna. Beeraleeyda soo laabta waxaa la siin doonaa dookh ay kusoo cusboonaysiiyaan kirada dhul beeroodkooda horay u jiray.

Isha biyaha ayaa lagu rakibi doonaa meel u dhaw beerta. Fadlan u isticmaal biyaha si masuuliyadi ku jirto. Beeraleeyda ayaa masuul ka ah inay la yimaadaan tuubooyinkooda gaarka ah. Tuubooyinka looga tago beerta waxaa masuuliyada khatarta ku imaan karta qaadaaya beeraleeyda. Beeraleeydu waa inay xasuustaan meesha ay dhigaan tuubooyinkooda xili kasta. Tuubooyinka LAMA marsiin karo dhul beereedka dadka kale. Haddii waxyeelo loo gaysto si joogto ah beeraha kale ayna gaystaan tuubooyinka beeraleeyda looma sii ogolaan doono inay adeegsadaan.

Beeraleeyda ayaa masuul ka ah ilaalinta iyo dayac tirka dhulka beertooda inta lagu jiro xili beereedka. Qoditaanka, waraabinta, harameynta, gurashada, iyo shaqo kasta oo kale oo beerta qusaysa ayaa dhammaan ah masuuliyad saaran beeraleeyda. Sidoo kale waa masuuliyad saaran beertaha inuu ka nadiifiyo marinnada lagu socdo ee ku wareegsan dhulkiisa beerta qashinka, xashka geedaha, iyo agabka.

Beerta bulshada ayaa la heli karaa subixii ilaa makhribkii, maalin kasta inta lagu jiro xili beereedka.

Waa masuuliyad saaran beertaha inuu u sheego gudigga beerta haddii uusan awoodin inuu daryeelo dhul beereedkiisa muddo dheeraad ah. Haddii dhul dayacmo sabab la xariirta dayacaad, beertaha ayaa la siin doonaa ogaysiiska nadiifinta meesha. Haddii nadiifintu aysan dhicin, mulkiilaha dhul beereedka hadda ayaa luminaaya xaquuqaha dhul beereedka dhul beereedkana waxaa la siin doonaa qof kale. Beertihii hore ayaa wali masuul ka ah ku celinta dhul beereedka siduu ahaa markii uu kiraystay. (La qoday ama la caro gadiyay lagana saaray haramaha ama xashka geedaha).

Beeraleeydu waa inay la yimaadaan qalabkooda beerista ee gaarka ah. Sababo badqab awgood, qalab ama agab noocuu rababa ha noqdee loogama tagi karo ujeedo la'aan goobta beerta.

Carruurta waa inuu la socdaa qof wayn waana in la kormeeraa markasta.

Eeyda **looma** oggola beerta marna.

Lama ogola daroogo ama khamri in lala yimaado beerta. Labada beerood ayaa ka caagan tubaakada.

Beeraleeyda ayaa keliya guran kara mirahooda gaarka ah, ilaa inuu fasax siiyo maahee beerte kale.

Ha adeegsan agabka bacriminta, sunta cayayaanka ama haramaha si uun u samaaynaaya dhul beereedyada kale.

Tixgelin sii dadka kale adoo beeraaya miro dhaadheer oo aan saamayn ku yeelanayn beeraleeyda dariska kula ah.

Xayndaabyada aad ayaa looga digayaa, laakiin haddii la adeegsado waa inay noqdaan kuwo siman oo adag aana ka dheerayn **36"**. Lama ogola in xayndaabku xanibo in la arko dhammaan beerta. Waxyaabaha la ogol yahay waa siliga iyo fiilooyinka loo adeegsado geedaha marmarka ah, kuwaasoo aan ka dheerayn 6 fuudh.

Geedaha la Diiday: Geedaha sunta ah, geedaha faafa, ama geedaha sharci darada ah **lama ogola**. *Geedaha macno darada ah waxaa kamid ah Jerusalem Artichokes, Gabal-dayaha, iyo Bamboo*. Mint ayaa lagu dhex beeri karaa weel laakiin dhulka laguma beeri karo.

Marna haku tuurin wax sida qashin, harama, agabka beerta, miro ama khudaar qurmay aaga u dhow beerta. Tuubada bacariminta ayaa loo samayn doonaa qashinka beerta ee sida saxda ah loo diyaarshay. Qasacyada qashinka ee banaanka beerta waxaa lagu ridaa basbaaska halaabay, qashinka, shabagyada, qalabka halaabay iwm.

Shabagyada, xajiyeyaasha, filooyinka geedaha ee ku meel gaarka ah iyo agab kasta oo beereed sida qasacyada waraabka, rakooyinka, marfashyada, iwm. WAA IN laga saaraa beerta, marka la xiro WAANA IN uu meel ku xareeyaa mulkiilaha dhul beereedku. Tiirarka geedaha abadiyanka ah ama qayb ahaan abadiyanka ah ee laamaha soo dhacaaya sida cinabka ama beeriga ayaa la ogol yahay, marka la hubiyo in si **ku filan loo ilaalinaayo laguna haynaayo GUDAHA xaduudaha dhul beereedka loogu talagalay.**

Gudigga Beerta ayaa masuul ka ah xaqiijinta in xeerarka la raaco markasta. Dhulka beerta waa in la ilaaliyaa markasta laguna hayaa si badqab leh, haddii xaaladu noqotana mid aan amaan ahayn, Gudigga Beerta ayaa ka doonaaya beertaha inuu xaliyo xaalada si degdeg ah. Haddii Gudigga Beerta iyo Department of Parks & Recreation, markay xirfadooda ku eegaan, go'aanshaan in dhulka beerta aan si sax ah loo ilaalin si joogto ah, sida caadiga ah, markaas Waaxda ayaa ogaysiis qoraal ah u diraysa beertaha masuulka ah ayadoo u sheegaysa inuu jabiyay tilmaamaha barnaamijkooda. Haddii beertuhu uusan ku jawaabin shan (5) maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood laga bilaabo taariikhda ku qoran ogaysiiska qoraalka ah, ee boostada lagu diray, markaa Parks and Recreation Department ayaa masuuliyada guud ee ilaalinta dhulka la wareegaysa ayadoo u aqoonsanaysa in la jabiyay xeerka.

ALL PLOTS MUST BE CLEARED OF ALL DEBRIS AT THE END OF THE GROWING SEASON. PLOTS THAT ARE NOT CLEARED BY DECEMBER 1 WILL NOT BE GUARANTEED THEIR PLOT FOR THE NEXT GROWING SEASON.

BEGINNING WITH GARDEN REGISTRATION FOR THE 2022 SEASON ALL PLOT RENTALS WILL BE ASSESSED A \$50 REFUNDABLE DEPOSIT PER PLOT (DISCOUNTS WILL NOT BE GIVEN FOR MULTIPLE PLOTS). THIS DEPOSIT WILL BE REFUNDED ONLY IF YOUR PLOT HAS BEEN CLEARED OF ALL DEBRIS AT THE END OF THE GROWING SEASON (DECEMBER 1). REFUNDS WILL BE PROCESSED FOR ALL WHO QUALIFY IN JANUARY OF THE FOLLOWING YEAR.

Xogta Bacriminta

Fadlan ku qor saxeexaaga tilmaahaha bacriminta halka ku xigta soona celi foomkaan ood soo raacisay foomkaaga diiwaangelinta iyo lacag bixinta.

Shaqada bacriminta ee beer kasta waxaa ku jira qasacyada iyo tuubooyinka qashinka, kaasoo qaada wasaqda beeraha inta lagu jiro xili beereedka si looga sameeyo bacrimin la adeegsan karo gu'ga soo socda.

Mutadawiciinta ayaa maarayn doona qasacyada iyo tuubooyinka keliya. Tilmaamaha soo socda waxaa loo sameeyay in lagu yareeyo shaqada dhammaan beeraleyda iyo in la hubiyo samaynta bacrimin la aqbali karo, oo la adeegsan karo.

Xeerarka guud waa in QASACYADU ay helaan qashinka beeraha kaasoo gaaban, qoyan oo aan wasaq kale lahayn. TUUBADA QASHINKA waa inay qabataa qashinka beeraha oo dheer, qalalan aana lahayn wasaq.

1. Dhammaan wasaqda dheeraadka ah ayaa laga saari doonaa qashinka beeraha KAHOR intaan lagu shubin tuubada qashinka ama la gelin qasaaca. _____
2. Qashinka hanbada ah ayaa laga saari doonaa jiridaha adag iyo kuwa jilicda san kadibna waxa lagu shubayaa qasacyada. _____
3. Marka jiridaha adag iyo kuwa jilicsan lagu rakaynayo Tuubada Qashinka, hal jiho u jeedi. Waxay sahlaysaa ridiqa jiridaha adag iyo kuwo jilicsan marka dhamaan xididada u jeedaan isku dhinac. _____
4. Ka bixi dhammaan xargaha, waayirada, dabarrada, cinjirrada ama agabka kale ee laga soo furay jiridaha adag iyo kuwa jilicsan KAHOR intaan lagu rakayn Tuubada Qashinka. _____
5. JAR haramaha iyo wasaqda yar ee cagaaran dheerarka 6" ama kayar kahor intaadan ku darin qasaycada. _____
6. Fadlan HAKU shubin qashinka xoolaha qasacyada. _____
7. Fadlan HAKU shubin agabka waraaqaha ah ama caagaga ah qasacyada ama tuubada qashinka. _____

Heshiiska Beerta

Fadlan ku qor saxiixaaga tilmaahaha beerta halka ku xigta soona celi foomkaan ood soo raacisay foomkaaga diiwangelinta iyo lacag bixinta.

Saxiix

- ____1. Dhul beereedyada waxaa lagu baxshaa sida loosoo kala hormaro beeraleeyda cusubna MA codsan karaan in dhul beereed laga siiyo aag gaar ah, anaga ayaa dhul beereedka kuu qoondaynayna. Beeraleeyda soo laabta waxaa la siin doonaa dookh ay kusoo cusboonaysiiyaan kirada dhul beeroodkooda horay u jiray.
- ____2. Qarashka sanadkii ee dhulka beerta hadda waa **\$40** qofka deegaanka dagan halka uu yahay **\$50** qofka aan deegaanka ahayn dhul beereedka buuxa. Qarashka waxaa loo dirayaa Magaalada Reynoldsburg (**7232 E. Main St. Reynoldsburg Ohio**) waana in ayadoo buuxda la dhiibaa xiliga diiwaan gelinta. Lacagta dhul beereedka laguuma celinaayo. **Wax qiimo dhimis ah kuma helaysid dhul beereedyada badan.**
- ____3. Isha biyaha ayaa lagu rakibi doonaa meel u dhaw beerta. Fadlan u isticmaal biyaha si masuuliyadi ku jirto. Beeraleeyda ayaa masuul ka ah inay la yimaadaan tuubooyinkooda gaarka ah. Tuubooyinka looga tago beerta waxaa masuuliyada khatarta ku imaan karta qaadaaya beeraleeyda. Beeraleeydu waa inay xasuustaan meesha ay dhigaan tuubooyinkooda xili kasta. Tuubooyinka LAMA marsiin karo dhul beereedka dadka kale. Haddii waxyeelo loo gaysto si joogto ah beeraha kale ayna gaystaan tuubooyinka beeraleeyda looma sii ogolaan doono inay adeegsadaan.
- ____4. Beeraleeyda ayaa masuul ka ah ilaalinta iyo dayac tirka dhulka beertooda inta lagu jiro xili beereedka. Qoditaanka, waraabinta, harameynta, gurashada, iyo shaqo kasta oo kale oo beerta qusaysa ayaa dhammaan ah masuuliyad saaran beeraleeyda. Sidoo kale waa masuuliyad saaran beertaha inuu ka nadiifiyo marinmada lagu socdo ee ku wareegsan dhulkiisa beerta qashinka, xashka geedaha, iyo agabka.
- ____5. Beerta ayaa diyaar noqonaysa Maayo 5^{teeda} ilaa dhammaadka Oktoobar. **Beeraleeyda ayaa masuul ka ah "inay xiraan beertooda" una diyaarshaan beerta xiliga gu'ga ugu danbayn Diseembar 1^{deeda}.**
- ____6. Beerta bulshada ayaa la heli karaa subixii ilaa makhribkii, maalin kasta inta lagu jiro xili beereedka.
- ____7. Waa masuuliyad saaran beertaha inuu u sheego gudigga beerta haddii uusan awoodin inuu daryeelo dhul beereedkiisa muddo dheeraad ah. Haddii dhul dayacmo sabab la xariirta dayacaad, beertaha ayaa la siin doonaa ogaysiiska nadiifinta meesha. Haddii nadiifintu aysan dhicin, mulkiilaha dhul beereedka hadda ayaa luminaaya xaquuqaha dhul beereedka dhul beereedkana waxaa la siin doonaa qof kale. Beertihii hore ayaa wali masuul ka ah ku celinta dhul beereedka siduu ahaa markii uu kiraystay. (La qoday ama la caro gadiyay lagana saaray haramaha ama xashka geedaha).
- ____8. Beeraleeydu waa inay la yimaadaan qalabkooda beerista ee gaarka ah. Sababo badqab awgood, qalab ama agab noocuu rababa ha noqdee loogama tagi karo ujeeddo la'aan goobta beerta.
- ____9. Carruurta waa inuu la socdaa qof wayn waana in la kormeeraa markasta.
- ____10. Lama ogola daroogo ama khamri in lala yimaado beerta. Labada beerood ayaa ka caagan tubaakada.

_____11. Beeraleeyda ayaa keliya guran kara mirahooda gaarka ah, ilaa inuu fasax siiyo maahee beerte kale.

_____12. Ha adeegsan agabka bacriminta, sunta cayayaanka ama haramaha si uun u samaaynaaya dhul beereedyada kale.

_____13. Tixgelin sii dadka kale adoo beeraaya miro dhaadheer oo aan saamayn ku yeelanayn beeraleeyda dariska kula ah.

_____14. Xayndaabyada si wayn ayaa loo diidayaa, laakiin haddii aad isticmaasho waa inay noqdaan kuwo siman oo adag aana ka dheerayn **36"**.

Lama ogola in xayndaabku xanibo in la arko dhammaan beerta. Waxyaabaha la ogol yahay waa siliga iyo fiilooyinka loo adeegsado geedaha marmarka ah, kuwaasoo aan ka dheerayn 6 fuudh.

_____15. Geedaha la Diiday: Geedaha sunta ah, geedaha faafa, ama geedaha sharci darada ah **lama ogola**. *Geedaha macno darada ah waxaa kamid ah Jerusalem Artichokes, Gabal-dayaha, iyo Bamboo.* Mint ayaa lagu dhex beeri karaa weel laakiin dhulka laguma beeri karo.

_____16. Marna haku tuurin wax sida qashin, harama, agabka beerta, miro ama khudaar qurmay aaga u dhow beerta. Tuubada bacriminta ayaa loo samayn doonaa qashinka beerta ee sida saxda ah loo diyaarshay. Qasacyada qashinka ee banaanka beerta waxaa lagu ridaa basbaaska halaabay, qashinka, shabagyada, qalabka halaabay iwm.

_____17. Shabagyada, xajiyeyaasha, fiilooyinka ku meel gaarka ah ee beerta iyo agab kasta oo beereed sida qasacyada waraabka, rakooyinka, marfashyada, iwm. waa in laga saaraa beerta marka la xiro **WAANA IN** uu meel ku xareeyaa mulkiilaha beertu. Tiirarka geedaha abadiyanka ah ama qayb ahaan abadiyanka ah ee laamaha soo dhacaaya sida cinabka ama beeriga ayaa la ogol yahay, marka la hubiyo in si **ku filan loo ilaalinaayo laguna haynaayo GUDAHA xaduudaha dhul beereedka loogu talagalay.**

_____18. Gudigga Beerta ayaa masuul ka ah xaqiijinta in xeerarka la raaco markasta. Dhulka beerta waa in la ilaaliyaa markasta laguna hayaa si badqab leh, haddii xaaladu noqotana mid aan amaan ahayn, Gudigga Beerta ayaa ka doonaaya beertaha inuu xaliyo xaalada si degdeg ah. Haddii Gudigga Beerta iyo Department of Parks & Recreation, markay xirfadooda ku eegaan, go'aanshaan in dhulka beerta aan si sax ah loo ilaalin si joogto ah, sida caadiga ah, markaas Waaxda ayaa ogaysiis qoraal ah u diraysa beertaha masuulka ah ayadoo u sheegaysa inuu jabiyay tilmaamaha barnaamijkooda. Haddii beertuhu uusan ku jawaabin shan (5) maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood laga bilaabo taariikhda ku qoran ogaysiiska qoraalka ah, ee boostada lagu diray, markaa Parks and Recreation Department ayaa masuuliyada guud ee ilaalinta dhulka la wareegaysa ayadoo u aqoonsanaysa in la jabiyay xeerka.

_____19. Eeyda **looma** oggola beerta marna.

_____20. I have read the rule regarding the \$50 deposit per garden plot (page 9).

_____21. I have read the rule regarding clearing debris from garden plots by December 1 (page9).

Fadlan Far Qeexan Ku Qor:

Beertaha: _____ Iimeelka Beertaha: _____

Ciwaanka Beertaha: _____ Magaalada: _____ Siibka: _____

Taleefanka Guriga: _____ Taleefanka Shaqada: _____ Taleefanka Gacanta: _____

Xogta xariirka degdega ah: _____

Magaca

Taleefanka

Fadlan iska qor ugu varaan hal shaqo/shagaale beereed ee ku qoran hoos.

___ Shaqaalaha Dhulka: waxay ilaaliyaan aagaga guud ee beerta bacriminta

___ Shaqaalaha Bacriminta: waxay ilaaliyaan aaga

___ Taariikh Yahanka Beerta: wuxuu qaadaa sawirada bandhiga beerta gacan ka gaystaa calaamadaynta

___ Jack/Jill dhammaan ganacsiyada: wuxuu

Goobahee door bidaysaa (fadlan goobin geli midkood): Livingston Ave

Civic Park

Haddii aad tahay beerte cusub, ma doonaysaa in beerte khibrad leh ku caawiyo?

Haa ___ Maya ___

Haddii aad tahay beerte khibrad leh, ma doonaysaa inaad caawiso beerte cusub?

Haa ___ Maya ___

Ma doonaysaa inaad beerta la wadaagto beerte kale?

Haa ___ Maya ___

Haddii ay haa taay, ma beeraysaa miro qaboow? (tusaale: Salmuko, Radish, Isbiinaaj, Salar)

Haa ___ Maya ___

Ma qorshaynaysaa inaad beerto perennials?

Haa ___ Maya ___

Haa ___ Maya ___

FEES PER GARDEN PLOT

Half Plot Resident \$20.00 _____ Half Plot Non-Resident \$25.00 _____

Full Plot Resident \$40.00 _____ Full Plot Non-Resident \$50.00 _____

Refundable Deposit \$50.00 _____ per plot

Heshiiskan Beertu waa isbadali karaa.

Dhammaan xeerarka, tilmaamaha, iyo sharciyada Magaalada Reynoldsburg iyo Degmada Truro ayaa ka xoog badan xog kasta oo ku qoran Heshiiskan Beerta haddii loo arko inay iskasoo horjeedaan.

Waan akhriyay waana fahmay heshiiska isticmaalaha beerta Livingston Garden.

Saxiixa Beertaha

Taariikhda

HESHIISKA OGOLAANSHAHA

Halkan waxaan ka cadaynayaa inaan ka weynahay siddeed iyo toban (18) sano oo maskaxdayda iyo jirkayguba ay fiyowyahiin waxaana halkan ku ogolaaday inaan aniga, ama cunug yar, uu si ikhtiyaari ah uga qaybgalo Barnaamijka (Barnaamijyada) Nashaadaadka ee Reynoldsburg, waxqabadyada iyo dhacdooyinka xiriirka la leh, ama inaan si tabarucaad ah uga qaybgalo barnaamij ay taageerto Degmada iyo Magaalada Reynoldsburg.

Waxaan halkan ku sii ogolaaday inaan Degmada Truro iyo Magaalada Reynoldsburg, shaqaalaheeda, maamulayaasha bulshada, tabarucayaasha, hay'adaha taageera, taageerayaasha, xayaysiistayaasha, iyo haddii ay jirto dadka leh ama kiraysta dhismayaasha dhacdada lagu qabanayo ka cafiyo waxii sheegasho ah oo dhaawac, naafanimo, ama dhimasho ku timaadda qof ama hanti, shil aan anigu galay ama ka qaybqaadasho ama uu cunuggaygu galay ama ka qaybqaadashadiisa barnaamijyadan.

Waxaa la isku sii raacsan yahay inaan aqoonsanahay dhamaan khatarta, mid la ogyahay iyo mid aanan la ogayn, oo aan aqoonsanahay inaan mas'uul buuxa ka ahay ka qaybgalkayga iyo tan cunuggayga. Waxaa la isku sii raacsan yahay inaan u hogaansami doono sharuudaha iyo xaaladaha la sheegay iyo kuwa dhaqan ee barnaamijka looga qaybqaadanayo. Haddii aan la kulmo wax walaac ah oo saamayn ku leh ka qaybqaadashadayda iyo/ama tan cunuggayga, aniga ama cunuggaygaba waan ka baxayaa ka qaybqaadashada waxaana wargalinayaa Reynoldsburg Parks and Recreation Department.

Waxaa la isku sii raacay inaan waxba u qabsaneyn Magaalada Reynoldsburg, shaqaalaheeda, maamulayaasha bulshada, tabarucayaasha, hay'adaha taageera, taageerayaasha, xayaysiistayaasha, iyo haddii ay jirto dadka leh ama kiraystayaasha dhismayaasha dhacdada lagu qabanayo oo aan ka cafinayo waxii masuuliyad shil ah oo soo gaara aniga ama cunuggayga ama ku soo gaara ka qaybqaadashada Barnaamijka (Barnaamijyada) Nashaadaadka Reynoldsburg, dhacdooyinka iyo waxqabadyada la xariira, iyo/ama munaasabadaha Degmada Truro iyo Magaalada Reynoldsburg ay taageeraan. Gaaridda heshiiskan, waxaan halkan ku cadaynayaa inaan ku galay si ikhtiyaari ah oo aqoontayda iyo garashadayda ah oo aysan saamayn igu yeelan hadalada wakiilnimada aan heshiiskan lagu soo darin.

Saxiixa

Taariikhda

Fadlan Qor Magacaaga